

TALOOYINKA AAFADA OO DHAKHSO LEH: GURI KU-SOO-NOQODKA AASAASIGA AH

Ugu horeynta waa badbaadada

Kahor inta aadan galin dhisme daadadku galeen, ka taxaddar badbaadada. Iska ilaali bilasterka derbiga, gidaarka-engegan (drywall) iyo saqafka dabacsan ee soo dhici kara.

Xiro kabo adag

Cagaha nabarku ku dhaco ayaa ah dhaawacaha ugu badan ee ka dambeeya aafada.

Isticmaal nalalka quwadda-beytariga leh

Isticmaal nalalka quwadda-beytariga ku shaqeeya ama tooshashka haddii aad u baahato nal waqti gaaban.

U fiirso waxyaabaha dabka halistooda keeni kara.

Dabka ayaa ah halista ugu caadisan kadib daadadka. U fiirso:

- Tuubbooyinka gaasta ah ee jaban ama sii-deynaya;
- Fiilooyinka korantada ee daadadku galeen;
- Shooladaha iyo qalabyada korontada ee biyaha hoostooda ku jira;
- Sheyda dab qabsan kara ama qarxi kara.

Hubi inay jiraan gaasta oo siideysma

Haddii aad uriso gaasta ama aad maqasho qarax ama cod xiin leh:

- Isla markaaba ka tag dhismaha;
- Gaasta ka dami qasabadda ugu weyn ee dibadda haddii aad karto; iyo
- Uga wac shirkadda gaasta meel fog.

Haddii aad demiso gaasta sabab kasta ha noqotee, waa inuu qof aqoon u leh uu dib u daaraa.

U fiirso burburka korantada

Ha dhex dhex galin lugta biyaha:

- Haddii aad aragto dhinbiillo, fiilooyin googo'an ama sariigan;
- Aad uriso dahaar (insulation) gubanaya; ama
- Dami korontada.

U wac xirfad-yaqaan koronto si aad caawimo u hesho.

Haddii si badbaado leh aad u gaari karto sanduuqa fiyuuska ama jabiyaha qulqulka korantada (circuit breaker), dami korontada.

Si tartiib ah u soo saar qasabada biyaha

Si tartiib ah u saar daadadka biyaha ee fariistay. Ka nuug biyaha saddex daloolow hal biyaha maalintiiba si looga hortago dhaawac soo gaadha didaarka gidaarada. Caddaadiska biyaha ee ku tiirsan gidaarada ciida dibada ayaa waxay dhaawaci karaan gidaarada haddii aad si degdeg ah uga nuugto biyaha.

Haddii aad ugu baahato dokumentigan qaab kale oo ay ka midka yihiin farta waaweyn, Braille, ama cajalad, la xiriir (651) 201-5000 ama (800) 657-3908.

Dadka dhagaha la' ama dadka maqalkuku culus yahay TTY: (651) 201-5797.